

## TALLAALKA LOOGA HORTAGO TIIBISHADA

### Tiibishada

Tiibashada waxaa keeno caabuqa jeermiska tiibishada. Kaliya tiibisha sambabada oo aan la daaweyn ayaa faafa. Sida caadiga ah ee cudurka waa dhecaanka caabuqa ee qofka qunfaco jeermiska. Ku dhawaad 10 % oo dad qaaday way jiradaan, iyo sanooyin badan ayaa dhammaan karo inta cudurkan uu san hormarin ka hor. Cudurka badanaa wuxuu soo weeraraa sambabada, laakin wuxuu sidoo kale keeni karaa caabuq qeybo kale oo jirka ah sida fadhiga maskaxda, qanjirada, mandhiciirada, lafaha, xubnaha iyo kelyaha.

Norway waxay ka mid tahay wadamada aduunka oo leh dhacdooyinka ugu yar ee tiibishada, 350-400 oo dacwado cusub sanad walbo. Ilaa waqtigii 1997, waxaa jiray hoos u dhac tirada dacwadaha ah. Sanadihii ugu dambeeyay, waxaa jiray kordhasho badan sababtoo ah socdaalka ka imaanayo wadamada dhacdada cudurka uu ku sareeyo. Ku dhawaadkii 90 % oo kuwa la xannuunsaday waxay ku dhasheen wadan dhacdada tiibishada uu ku sareeyo, iyo badankood waxay saameysay inta aysan imaanin Norway. Inkastoo xitaa ay yar tahay halista lagu qaado tiibishada gudaha Norway, waxay ku sareyn kartaa deegaanka la xiriiro wadamada meesha cudurka uu caadiga ka yahay. Sidaas darteed tallaalka BCG ayaa la siiyaa carruurta leh xiriirka noocaas ah.

### TALLAALKA TIIBISHADA

Tallaalka wuxuu wataa nolol, tabar daro jeermiska tiibishada ah, Bacille Calmette Guérin, iyo waxaa loo yaqaan BCG. Tallaalka waxaa lagu duraa gacanta bidixda ee kore. Sida caadiga "fin" yar ama nabar yar oo xanuun ah ayaa ka soo baxayo dhinaca durmada dhoor isbuuc ka dib. Xannuunka ma wax yeeleyneyso, iyo way bogsootaa waqti gaaban ka dib. Dadka qaarkii sidoo kale qanjirada ayaa barraro oo ka dareemo sida kilkishaha in uu gumac ugu jiro. Ilaa iyo 80 % oo kuwa tallaalan waxay helaan ka hortaga tiibishada ah. Ka hortaga wuxuu shaqeyaa 1-3 bilood tallaalka ka dib iyo waqti dheer ayuu raagaa.

Waxaa lagula taliyay in tallaalka carruurta la siiyo da'da lixda isbuuc ah. Adigoo tallaalayo carruurta, tiibisho halis ah oo aasaasanto sanooyinka hore ee nolasha ayaa si gaar ah ay uga hortagtaa. Dhacdada halista cudurka ee deegaanka ku xeeran, carruurta weyn sidoo kale waxaa la siiyaa tallaalka BCG. Carruurtaan, waxay noqon kartaa muhiim in la sameeyo baaritaan marka hore si loo xaqiijiyo hadii cudurka uu mar hore ku dhacay iyo sidaas darteed ma ka fa'idaayaan tallaalka.

Hadii canug uu qabo caafimaad yari ama isticmaalo daawooyin, qofka masuulka ka ah canuga waa in uu la soo socodsiiyaa arintaan. Dadka qabo cudurka HIV iyo xannuuno kale oo difaaca jirka oo daciifo sida caadiga waa in uu san qaadan tallaalka BCG.

#### Saameynt-dhinaca:

Dareemaha caadiga ah oo ka weyn ama ka dheer inta la filanaayay waa marmar. Barraro ah qanjiraha dhinaca durida way dhici kartaa. Dhacdo noocaas ah waxay noqon kartaa mid aan wanaagsaneen laakin halis ma ahan. Dacwadaha marmarka aadka ah, waxay noqon kartaa muhiim in la siiyo daaweyn caafimaad.